


Markii wiilkeedii Seet dhashay, Xaawo waxay tidhi, "Ilaah abuur kaluu ii soo dhigay Haabiil meeshiisii." Seedna waxa uu ahaa nin xaq ah oo wuxuu noolaa 912 sanadood isagoo carruur bandanna dhalay.



19

Dunida dhexdeeda, dadkii waxa ay noqdeen kuwo marba marka ka danbaysa sii xumaada oo facba facba kaluu raacay. Ugu danbayntii, Ilaah inuu baabi'iyoo aadanaha ...




20

... dugaagga oo dhan iyo shimbiraha. Ilaah waxa uu ka caloolxumaaday inuu abuuray dadka. Laakiinse nin qudha ayaa Ilaah raalli geliyay ...




21

Ninkani waxa uu ahaa Nuux. Waxa uu ahaa farcankii Seet, oo Nuuxna waxa uu ahaa nin xaq ah. Waxa uu ahaa mid ku xidhan Ilaah.



22

Bilowgii murugada dadka



Sidoo kale saddexdiisii wiil ee uu dhalay waxa uu baray inay Ilaah addeecaan. Imika haddaba Ilaah wuxuu qorsheeyay inuu Nuux u adeegsado si gaar ah oo cajiib leh!



23

Bilowgii murugada dadka

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah, Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Bilowgii 3-6

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

Waxa qoray Edward Hughes
Waxa Tusaaleeyay Byron Unger; Lazarus

Waxa tarjumay Zemendale Translation Service
Waxa dhaqan-geliyay M. Maillot; Tammy S.

Qisada 2 ee 60

M1914.org

Bible for Children, PO Box 3, Winnipeg MB R3C 2G1 Canada

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu ku magacaabo denbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho.


Ilaah si aada ayuu inoo jecelyahay waxaanu soo diray Wiilkiisa, Ciise, si uu ugu dhinto Iskutallaab korkeeda una bixiyo qaanta denbiyadeenna.

Haddaad rabo inaad kasoo laabato xad-gudubyadaada, sidan ku dhex Ilaah: Ilaahaygii weynaayow, waxaan rumaysanahay inuu Ciise u dhintay aniga aawaday isagoo haddana nool. Fadlan ii kaalay oo iga cafi denbiyadayda, si aan imika u helo nolol cusub, oo aan adiga weligaa kuula jiro. Igu caawi inaan adiga awгаа u noolaado anoo ka dhigan ilmahaaga. Aamiin. Yooxanaa 3:16

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba Ilaah la hadal!

Somali

Ilaah wuxuu abuuray waxwalba. Markii Ilaah abuuray ninkii ugu horreeyay oo ahaa Aadan, waxa ay ninka iyo naagtiisii Xaawa ahaydba ku wada noolaayeen Beer Ceeden.



1

Waxay ahaayeen kuwo farxad buuxda haysta oo addeecaya Ilaah kuna faraxsan la joogitaankiisa ilaa lagasoo gaadhayay maalin ka mida maalmaha ...




2




"Ilaah miyuu idinku yidhi, Waa inaydnaan waxba ka cunin geed kasta oo beerta ku yaal?" Abeesadii ayaa Xaawa weydiisay su'aashan. Waxay iyana ku jawaabtay, "Midhaha geedaha beerta waannu cuni karnaa marka laga reebo mid."

3




"Haddii geedkaas aannu wax ka cunno waannu dhiman doonnaa." Abaasadii ayaa dabeetana uugu jawaabtay, "Ma dhiman doontaan."

4




"Waxa aad noqon doontaan sida Ilaah oo kale." Xaawa waxay doontay geedkii. Waxa ay dhegeystay abeesada oo midhihiina waxbay ka cuntay.

5




markii Xaawa ay caasiday Ilaah sidoo kalena Aadan ayay ku sababtay inuu isna midhaha wax ka cuno. Waxay ahayd Aadan inuu yidhaahdo, "Maya! Anigu ma caasiyi doono ereyga Ilaah."

6




markii Aadan iyo Xaawa ay denbaabeen, labadoodiiba waxay ogaadeen inay qaawan yihiin. Waxay isku toleen caleemo berde, waxa ay dabeetana isku dayeen inay iska qariyaan Ilaah.

7




Markii maalintu qabowday ayaa Ilaah yimid beerta. Waxa uu ogoosnaa waxa ay Aadan iyo Xaawa sameeyeen. Aadan wuxuu eedeeyay Xaawa. Xaawana waxay eedaysay Abeesada. Ilaahna wuxuu yidhi, "Abeesadu way habaaran tahay. Naagtuna waxay ilmo ku dhali doontaa xanuun."

8




"Aadanow, maadaama oo aad denbaabtay, dhulku wuu habaabaran yahay oo waxa kaagasoo bixi doona qodxan iyo yamaarug. Waad dhididi doontaa oo dhibaatoon doontaa si aad wax uugala soo baxdo."

9




Ilaah wuxuu Aadan iyo Xaawa ka saaray beertii cajiibka ahayd. Waayo waa ay denbaabeen, waxaana laga soocay Ilaaha nolosha bixiya!

10




Ilaah wuxuu sameeyay seef ololaysa si ay bannaanka usii ahaadaan. Ilaah wuxuu Aadan iyo Xaawa dhar uuga dhigay hargo. Xaggee Ilaah haddaba ka keenay hargaha?

11




Markii ay goska noqdeen ee ilmo u dhashay Aadan iyo Xaawa, ilomhoodii ugu horreeyay wuxuu ahaa Qaabiil oo beer falato ah. Ilmohoodii labaad oo ahaa Haabiil, waxa uu isna ahaa adhi jire.

12



Maalin maalmaha ka mida ayaa Qaabiil wuxuu Ilaah u bixiyay xoogaa khudaar ah. Haabiilna waxa uu Ilaah qurbaan ahaan uugu bixiyay mid ka mida adhiigiisa kuwa uugu fiican. Ilaahna wuxuu ku farxay hadiyadda Haabiil.

13



Ilaah kumuu farxin hadiyaddii ama qurbaankii Qaabiil. Dabeeto Qaabiilna wuu cadhooday. Laakiin Ilaah wuxuu isaga ku yidhi, "Haddaad wax wanaagsan samaysid, sow laguma aqbaleen?"

14




Qaabiil cadhadiisii kama ayna dhammaanin. Wakhti dabadiisna waxa uu weeraray walaalkiis Haabiil oo waanu dilay isaga.

15



Ilaah wuxuu la hadlay Qaabiil isagoo ku leh, "Walaalkaa Haabiil meeh?" isna waxa uu ku jawaabay, "Ma aqaan: ma anigaa ah walaalkay ilaaliyihiiisa?" Ilaah waxa uu dabeetana isaga ku ciqaabay in aanu awood u yeelan doonin inuu dhulka beerto oo uu noqon doono mid carcarara.

16



Qaabiil waxa uu ka tegay Ilaah. Waxa uu dabeetana guursaday gabadii ay dhaleen Aadan iyo Xaawa, waxaanay noqdeen qoys. Si dhakhso ahna, Qaabiil carruurtu awowga u ahaa iyo kuwaasi kuwii ay sii

17



Sidoo kalena, qoyskii Aadan iyo Xaawa si dhakhso ah ayay u koreen. Wakhtigaas isaga ahna dadku waxa ay noolaan jeer cimri dheer.

18

dhaleeni waxa ay buuxiyeen magaaladii la asaasay.